CHILD CARE LAW CENTER

P.O. Box 9066 • Berkeley, CA 94709
415-558-8005 • info@childcarelaw.org
www.childcarelaw.org

# Ogow sharciga ku saabsan Xanaanada Ilmaha Guriga Dhexdiisa ee ku qoran Guryaha Kirada ee California - (California Rental Property)

***Shuruud!*** Daabacaadan waxaa loogu talagalay dadka guryaha kireeya oo leh guryo ama gacanta ku haya guryo *ijaar oo* la degan yahay.

Dadkan waxaa ka mid ah:

- Milkiilayaahsa,
- Mareeyayaasha guryaha,
- Milkiilayaasha guryaha,
- Ururada Milkiilayaasha Guryaha (HOAs), iyo
- Dadka kale ee guryaha bixiya.

Xarunta Sharciga Xannaanada Carruurta *ma* matelo ama talo dhanka sharciga ah u ma fidiyaan dadka guryaha bixiya.

## Xanaanada Ilmaha ee Guriga Dhexdiisa

**1. Waa maxay "xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa?"**

- "Xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa" waa barnaamij xanaano caruur oo qofka shati uu haysto inuu ilmaha gurigiisa dhexdeeda ku hayo, guriga ha noqdo mid uu qofka ijaarto ama guri qofka iska leeyahay.[1] Qofkan guriga dhexdiisa ilmaha ku xanaaneeya waxaa loogu wacaa "qof xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ugu fidiya."

- Waaxda Adeegyada Bulshada ee California, Qaybta Shatiga Daryeelka Bulshada (Shatibixinta Daryeelka Jaaliyadda) ayaa shatiga bixiya oo korna kala socda xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa lagu hayo. Waaxyaha dab-damiska ee deegaanka ayaa sameeya kormeerka oona fasaxa codsadayaasha guriga dhexdeeda ilmo badan rabo inay ku hayaan.daryeelka carruurta ee qoyska waaweyn.[2]

- Dadka xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ugu fidiya waa inay raacaan heerka caafimaadka, badbaadada, iyo dabka gobolka si loo siiyo shati.

- Waxaa jira 2 nooc oo shatiga daryeelka carruurta qoyska ee guriga ilmaha lagu qabto ah – mid waa tiro yar iyo tiro badan ee xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa qoyska ku hayo.[3]

- Magaalooyinka, degmooyinka, iyo kuwa guryaha ijaara ma sharciyayn karaan (sharci u ma dijin karaan oo mana dhaqangelin karaan) xeerarka loo dejiyo dadka guryaha dhexdiisa ilmaha ku qabta.[4]

- Dadka ilmaha guriga dhexdiisa ku qabta waxay guriga dhexdiisa ku fidiyaan bay'ad barbaarin, saacado wakhti kasta ah, iyo goobo xaafaddaha dhexdeeda ah oo la heli karo.

- Xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa qoysaska waxay u tahay meelaha ugu muhiimsan ee ilmaha lagu daryeelo oo loogu talagalay dhallaanka iyo ciyaalka sabiga ah.

- Dadka xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ku qabta waxay caruurta ay u fidiyaan bay'ad dhaqanno kala duwan iyo meel luqad ay ku bartaan oo daryeelkooda ilmaha ugu fidyaan.

Waxbadan oo xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa ka baro adiga oo booqda Shatibixinta Daryeelka Jaaliyadda halkan https://www.cdss.ca.gov/inforesources/community-care-licensing/process.

## Arjiyada Ijaarka

**2. Ma diidi karaa in aan guriga ka ijaaro qof anigoo u sababaynaya in qofkaas uu rabo in guriga aan ijaaro rabo inuu guriga ka furto meel ilmaha uu ku xanaaneeyo?**

**Maya.** Qofka guriga iska leh *ma diidi* karo in guriga ka kireeyo qof *kaliya* isagoo u sababeeynayo inuu qofka rabo ama damacsan yahay inuu guriga ka furto meel ilmaha lagu xanaaneeyo isagoo shati u haysta.5

Dhammaan dadka guryaha ijaarta ee reer California waxaa laga difaacayaa inay sameeyaan wax takoor ah ee dhanka guryaynta ee hoos yimaada xeerka California Xeerka Shaqaalaysiinta iyo Guryeynta ee Cadaalada ah iyo Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee Unruh.[6]

Xeerarkan ka ilaaliyaan kiraystayaasha in loo diido guri kiro ah sababtoo ah kiraystaha:

- Isha dakhliga (halka iyo sida dakhliga ay ku kasbadaan);

- Isir;
- Middab;
- Asal qaran (oo uu ku jiro xaddidaadaha isticmaalka luqadda);
- Fir;
- Diin;
- Jinsi;
- Jinsiga, aqoonsi jinsi, iyo muujin jinsi;
- Hanaan jinsi;
- Xaalad guur;
- Ahaansho askari ama ahaansho ciidan;
- Xaaladda qoyska (qoys ay u joogaan carruurta 18 sano jir ka yar ama shakhsiyaad uur leh);
- Naafnimo (mid dhimir iyo jireed);
- Macluumaad hide-side;
- Da;
- Muwadinnimo;
- Luuqadda koowaad; **iyo**
- Xaaladda socdaal(Immigration).[7]

Haddii qof guri ijaarte ah uu la kulmo takoor dhanka guriga, waxay xaq u leeyihiin:
- Inuu qofka maxkamad ku dacweeyo in lagu xadgubay xuquuqdiisa, **iyo**
- Dacwo u gudbiyo Waaxda Xuquuqda Madaniga (Civil Rights Department).[8]

Waxaa jira sharciyo maxalli ah iyo kuwo federaal ah oo sidoo kale qofka kiraysataha ka ilaalinaya takoor dhanka ga guryaha.

**<u>Nooca Guriga Kirada</u>**

3. **Qofka kiraysataha ah guriga ama abaartmentida ma ku dhex samysan karaa inuu guriga dhexdiisa ka samaysto meel ilmaha lagu xanaaneeyo ee guriga ama guri dabaq ah?**

**Haa.** Qofka kireysataha ah guriga wuxuu ka dhex samaysan karaa meel yar oo ama guri weyn inuu ilmo si shatiyaysan ilmo uu ku xanaaneeyo:
- Gurigaaga caadiga ah ama guryaha dabaqa ah;
- Abaartment, kondomiiniyan, tawnhaawuska;
- Qaybaha guryaha ijaarka ee ku dhexyaala noocyada kale ee dhismayaha ee qoysas badan;[9] **ama**
- Guryo guurguura iyo guryo la warshadeeyay.[10]

**<u>Ogeysiiska ku socota Guri Bixiyaha</u>**

4. **Kiraystuhu ogolaansho ma iiga baahan yahay ka hor inta uusan samaysan xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa?**

**Maya** Kireysteyaashu ogolaansho uga ma baahna in guri kireeyaha uu fasax ka helo in guriga dhexdiisa ilmo ku xanaaneeyo:
- Ilaa 6 carruur adiga qaata shatiga daryeelka ilmaha ee guriga iska yar ee qoyska, **ama**
- Ilaa 12 carruur adiga qaata shatiga daryeelka ilmaha ee guri wayn ee qoyska.[11]

Guri kireeyaha *kuu ma* diidi karo, kaa xaddidi karo, ama ma sharciyayn karo isticmaalka guriga kiraynta ee ilmaha lagu xanaaneeyo.[12]

Sharciga jira sababtoo ah sharciga xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa lagu qabto:
- Ayaa daryeel daruuri ah u fidinya carruurta ay da'doodu u dhaxayso 0-5 sano,
- Waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ka caawi inay ka shaqeeyaan meel ka baxsan guriga oo ay helaan dakhli ay naftooda iyo qoysaskoodaba ku masaruufaan,
- Taageera bulshooyinka deegaanka iyo dhaqaalaha shaqadooda, **iyo**
- Kaliforniya waxaa ka jira shaqaale daryeel carruur la'aan oo baahsan oo waxaa baahi wayn ka jirta qoysas badan oo u baahan in carruurta loo qabto.[13]

**Laakin** haddii qof guri ijaaranaya uu rabo inuu guriga uu ku hayo
- 7 ilaa 8 carruur adiga oo qaata shatiga daryeelka ilmaha ee guri iska yar ee qoyska, **ama**
- 13-14 carruur adiga oo qaata shatiga daryeelka ilmaha ee guri wayn ee qoyska –

waa inay milkiilaha guriga waydiistaan oo ay fasax ka qaataan ka hor inta aysan qaban.[14]

Kiraystayaasha waxay sidaas ku samayn kara [Daryeelka Bulshada](#) [Milkiilaha/Qofka leh Guriga Foomka Oggolaanshaha](#) (LIC 9149).[15]

5. **Kiraystuhu aniga miyuu iigaga baahan yahay inuu ii sheego inay guriga ilmo ku qaban doonaan?**

**Haa.** Kiraystayaasha *waa in* milkiilaha guriga u sheegaan ama qofka guriga iskaa leh *qoraal ahaan* ugu sheegaan in ay qorshaynayaan in ay guriga ilmo ku xanaanayaan oo ay haystaan shatiga guriga.[16]

Kiraystayaasha tan wuxuu ku samayn kara [Daryeelka Bulshada](#)

[Qaybinta Shatibixinta Daryeelka.](#) [Foomka Oggolaanshaha Mulkiilaha/Milkiilaha Guriga Xanaanada Ilmaha Daryeelka Guriga](#) (LIC 9151).[17]

**6. Kiraystuhu goor mee ayuu u baahan yahay inuu u sheego milkiilaha guriga inuu rabo inuu ilmo ku qabto guriga?**

Haddii kiraystuhu uu rabo inuu *bilaabo* xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa, waa inay

- U sheeg mulkiilaha ama mulkiilaha guriga *ugu sheeg qoraal ahaan*,
- **Ugu yaraan 30 maalmood** ka hor inta aysan bilaabin qabashada xanaanada ilmaha.[18]

Haddii qofka kiraystaha ah ay *horayba* u bilaawaday inay guriga ilmo ku xanaanayso oo ay guri cusub u guurto, waxaa dhici karta inay loo qabto wakhti cusub oo kama dambays ah oo ka duwan inay u sheegaan mulkiilaha ama mulkiilaha guriga.[19]

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto wakhtiga kama dambaysta ah, qofka kireeyaha ayaad wax ka waydiin kartaa.

**Heshiisyada Ijaarka iyo Xeerarka Gaarka ah**

**7. Kireeyuhu ma yeelan karaa guri qoys oo ilmo lagu qabto, inkastoo heshiiska guriga ay ku qoran tahay lagu"ma ganacsanayo?"**

**Haa.** Xitaa haddii heshiiska ijaarka ama heshiiska guriga uu mamnuucayo

- Xannaanada ilmaha, **ama**
- Ganacsi ama hawlo beec-mustar guriga dhexdiisa ka socda –

qaybta heshiiskaas *ma* quseeyo xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa.[20]

Guri kireeye u *ma* isticmaali karo heshiiska ijaarka ama heshiiyo kale inuu kiraystaha ka xaddido ama ka mamnuuco shatiga u saamaxaya inuu guri qoys oo ilmo lagu qabto. Xitaa haddii uu kiraystuhu saxiixo, qaybtaas heshiiska ama heshiiska aan la ansaxin oo *ma* awoodo in lagu fuliyo sharciga hoos yimaado.[21]

**8. Ma u sheegi karaa maalmaha iyo wakhtiyada kiraystaha loo ogol yahay inay guriga dhexdiisa ilmo ay ku qaban karaan iyo in kale?**

**Maya** Bixiyeyaasha guryaha sharci u *ma* la ha inay xaddidaan ama wakhti u dejiyaan maalmaha iyo wakhtiyada uu kireystuhu shatiga u haysta ay guriga dhexdiisa ilmo ku qabtaan.[22]

Kiraystaha ilmo wuxuu ilmo uu ku qaban karaa guriga inta lagu jiro maalinta ama fiidkii, maalmaha shaqada, iyo maalmaha fasaxa ah.

Shatibixinta Daryeelka Jaaliyadda (Community Care Licensing) ayaa ah mas'uulka kaliya ee qofka ilmaha guriga ku xanaaneeyo u sheegi kara goorta iyo sida ay guriga ilmaha ugu xanaanayn karaan.[23]

**9. Ma samayn karaa sharciyo gaar ah oo khuseeya kaliya kiraystayaasha guriga qoyska degan yihiin ilmo ku qabta?**

**Maya** Waa *sharci darro* in kireeyaha guriga inuu sameeyo oo uuna dhaqangeliyo xeerar gaar ah ee quseeya qofka guriga ay ka ijaareen ee guriga dhexdiisa si shatiyaysan ilmo ugu xanaaneeya.

Maxaa yeelay kireeyayaasha guriga awood u ma la'ha inay xaddidaan, mamnuucaan, ama xeer ku soo rogaan dadka shatiga u haysta inay guriga ilmo ku xanaaneeyaan.[24]

**Kiro ku Kordhinta**

**10. Ma kordhin karaa lacagta ijaarka ee bisha ay bixiyaan sababtoo ah ilmaha guriga qoyska ee ay ku xanaaneeyaan darteed?**

**Maya** Waa *sharci darro* in milkiilaha guriga in lacagta uu ku kordhiya lacagta bisha ee ay bixiyaan *kaliya* in sabab loogu dhigo in qofka ijaarka ugu jiro ay haysato shati ay guriga dhexdeeda ilmo ku xanaanayn karto darteed.[25] Lacag kasta oo lagu kordhiyo waa inay mid sharci ah oo hoos timaada xakamaynta kirada deegaanka iyo sharciyada gobolka.

Kiraystayaasha California, oo ay ku jiraan dadka ilmaha guriga dhexdiisa ku xanaaneeya, ayaa waxaa sharciga ka ilaalinayaa in lagu sameeyo takoorta guryaynta sida uu hoos yimaado sharciga [California Ee Sinnaanta Sharciga Shaqada iyo Guryeynta](#) iyo [Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee Unruh](#).[26] Sharcigan waxaa ku jira ka ilaalinta kororka kirada sharci darrada ah sababtoo ah kireystaha:

- Isha dakhliga (halka iyo sida dakhliga ay ku kasbadaan);
- Isir;
- Middab;
- Asal qaran (oo uu ku jiro xaddidaadaha isticmaalka luqadda);
- Fir;
- Diin;
- Jinsi;

- Jinsiga, aqoonsi jinsi, iyo muujin jinsi;
- Hanaan jinsi;
- Xaalad guur;
- Ahaansho askari ama ahaansho ciidan;
- Xaaladda qoyska (qoys ay u joogaan carruurta 18 sano jir ka yar ama shakhsiyaad uur leh);
- Naafnimo (mid dhimir iyo jireed);
- Macluumaad hide-side;
- Da;
- Muwadinnimo;
- Luuqadda koowaad; **iyo**
- Xaaladda socdaal (Immigration)**.**[27]

Haddii qof guri ijaarte ah uu la kulmo takoor dhanka guriga, waxay xaq u leeyihiin:
- Inuu qofka maxkamad ku dacweeyo in lagu xadgubay xuquuqdiisa, **iyo**
- Dacwo u gudbiyo Waaxda Xuquuqda Madaniga (Civil Rights Department)**.**[28]

Waxaa jira sharciyo maxalli ah iyo kuwo federaal ah oo sidoo kale qofka kiraysataha ka ilaalinaya takoor dhanka ga guryaha.

**Caymis**

**11. Dadka xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ku bixiya ma uga baahnaan karaa in ay caymiska daryeelka ilmaha ay galaan si ay guriga dhexdiisa ay ilmo ugu qabtaa?**

**Maya** Sida uu qabo sharciga California, qofka guriga ijaara *ma* waydiin karo qofka guriga ijaarta inuu guriga caymiska dareyeelka ilmaha gala si qofka shatiga u haysta inuu guriga dhexdiisa ay ilmo ugu qabtaan**.**[29]

Dadka xanaanada ilmaha gurida dhexdiisa ku bixiya looga ma baahnaan karo inay galaan caymiska daryeelka ilmaha. [30]

Hisa hoos timaada sharciga waafaqsan, bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka
*waa*:
- In ay helaan caymiska xannaanada ilmaha ee qoyska oo daboola dhaawacyada ku yimaada "kalyantiga iyo martida" caymis gaaraya ilaa $100,000 dhacdo kasta iyo 300,000 wadar ahaan;
- In ay helaan caddayn dammaanad oo gaaraysa ilaa $300,000 wadar ahaan; **ama**
- Feelka geli Affideefit Quseeya Caymiska Mas'uuliyadda ee Xanaanada Ilmaha Guriga Dhexdiisa Guryaha (Foomka Affideefitka LIC 282) oo ay saxiixeen waalidka iyo masuulka xannaanada ee ilmaha ay hayaan.[31]

Haddii dadka guriga dhexiisa ilmo ku xanaaneeya *aysan ku* jirin caymiska daryeelka guriga qoyska *waa in*:
- Ku wargelisaa dhammaan waalidiinta iyo mas'uuliyiinta barnaamijkaaga inaysan caymis ku jirin,
- Waalid kasta iyo mas'uul kasta ay saxiixaan Affideefit Quseeya Caymiska Mas'uuliyadda ee Xanaanada Ilmaha Guriga Dhexdiisa lagu Bixiyo (Foomka Affideefitka LIC 282), iyo
- Foonka 282 Affideefitka oo saxiixan geli feelka Shatiga si aad u hubiso inta lagu jiro kormeerka sanadlaha ah.[32]

Qaybta B ee Foomka waxa kaliya loogu talagalay daryeel bixiyayaasha qoyska ee guriga ijaar ugu jira. Qaybta B waxay qoyska u sheegaysaa in guri ijaaraha *aysan* daboolayn caymiska caymiskooda wixii shilal ee daryeelka ilmaha la xiriira.[33]

***Digniinta!*** Affideefitka LIC 282 foomamka waxaa ku qoran macluumaad asturan. Qofka daryeel bixiyaha qoyska *ma* tusi karo ama siin karo Foomamka Affideefitka LIC 282 qofka guriga ijaara.[34]

**12. Ma ugu baahan karaa qofka kireystaha inuu igu daro caymiskooda xanaanada ilmaha ee guriga ay ku qabtaan?**

**Haa**, laakiin *kaliya haddii* dhammaan shuruudahan oo dhan la buuxiyey:

- Kiraystuhu wuxuu horeyba u haystay ama qorsheynayaa inuu galo caymiska mas'uuliyadda daryeelka ilmaha qoyska,
- Guri kireeyaha uu weydiiyo in lagu daro caymiska qaab *qoraal ahaan*,
- Caymiska lama kansali doono ama lama cusboonaysiin doono haddii guri kireeyaha lagu daro, **iyo**
- Guri ijaaraha wuxuu ku raacsan yahay inuu bixiyo kharash kasta oo dheeraad ah si loogu daro caysmiska guriga.[35]

**13. Caymiska mulkiilaha gurigu ma la tirtiri karaa ama lama cusboonaysiin karaa sababtoo ah guriga daryeelka ilmaha qoyska ee kiraystaha?**

**Maya** Shirkad caymis *kaa ma* kansali karaan ama kuu ma diidi karaan inay kuu cusboonaysiiyaan caymiska guriga sabab la xiriira qofka caymiska ku qoran:

- Wuxuu ka shaqaystaa xanaanada ilmaha oo guriga dhexdiisa lagu qabto darteed, **ama**
- Wuxuu guriga ka ijaaray qof xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ku haysta oo shatiga qaba.[36]

Shirkadaha caymisku waxa kaliya loo kansali karaa ama aan loo cusboonaysiin karin sababo shari kale.[37]Wixii macluumaad oo dheeraad ah, la xiriir [Waaxda Caymiska ee California](#).

**<u>Guri-ka-saarid</u>**

**14. Ma ka saari karaa qof guriga ijaar ugu jiro maxaa yeelay guriga qoyska ayay ilmo ku qabtaan?**

**Maya** Waa *sharci-darro* in guri ijaaraha uu qofka guriga ijaar ugu jiro uu guriga ka saaro sababtoo ah guriga ayay ilmo ku xanaaneeyaan ama waxay qorsheenayaan in ilmo ay guriga qoyska si shatiyaysan rabaan inay ku qabtaan.[38]

Ku xanaanaynta guriga ilmo ama qorshaynta si shatiyaysan ilmo lagu xanaaneeyo *ma aha* sabab sharci ah oo qofka guriga looga saaro iyada oo loo marayo "khalad" ama "aan ahayn" qalad qofka reer California guriga looga saaro.

Dhammaan dadka guryaha ijaarta ee reer California waxaa laga difaacayaa in lagu sameeyo wax takoor ah ee dhanka guryaynta ee hoos yimaada xeerka California Xeerka Shaqaalaysiinta iyo Guryeynta ee Cadaalada ah iyo Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee Unruh.[39]Xeerarkan ka ilaaliyaan kiraystayaasha in loo diido guri kiro ah sababtoo ah kiraystaha:

- Isha dakhliga (halka iyo sida dakhliga ay ku kasbadaan);
- Isir;
- Middab;
- Asal qaran (oo uu ku jiro xaddidaadaha isticmaalka luqadda);
- Fir;
- Diin;
- Jinsi;
- Jinsiga, aqoonsi jinsi, iyo muujin jinsi;
- Hanaan jinsi;
- Xaalad guur;
- Ahaansho askari ama ahaansho ciidan;
- Xaaladda qoyska (qoys ay u joogaan carruurta 18 sano jir ka yar ama shakhsiyaad uur leh);
- Naafnimo (mid dhimir iyo jireed);
- Macluumaad hide-side;
- Da'
- Muwadinnimo;
- Luuqadda koowaad; **iyo**
- Xaaladda socdaal (Immigration).[40]

Haddii qof guri ijaar ugu jiro guriga si sharci darro ah looga soo saaro waxay xaq u leeyihiin:

- Inuu qofka maxkamad ku dacweeyo in lagu xadgubay xuquuqdiisa, **iyo**
- Dacwo u gudbiyo Waaxda Xuquuqda Madaniga (Civil Rights Department).[41]

Waxaa jira sharciyo maxalli ah iyo kuwo federaal ah oo sidoo kale qofka kiraysataha ka ilaalinaya takoor dhanka ga guryaha.

**<u>In loo Isticmaalo in la Dego ama lagu Ganacsado Guri?</u>**

**15. Guriga qoyska ee daryeelka carruurta lagu bixiyo ma waxaa loo isticmaalaa "ganacsi" guriga baa?**

**Maya** Guriga qoyska oo ilmo lagu haayo ee guriga qoyska degan yahay oo loo isticmaalo sida hoos timaada sharciyada dowladda gobolka iyo sharciyada dowladda hoose, ma aha gancsi ama beec-mushtar oo guriga laga sameeyo.[42]

Heshiiskaaga ijaarka ee aad guri ijaaraha la gashay waxaa dhici karta in guriga ganacsi lagu dhex samaysto uu mamnuucayo. **Laakin** qodobbada heshiiska ee mamnuucaya ganacsiyada ama isticmaalka beec-mushtarka guri ijaar ah *ma quseeyo* dadka guriga ilmaha ku xanaaneeyo.[43]

***Digniinta!*** Magaalooyin iyo degmooyin badan oo California ku taala ayaa weli u qoran sharciyo maxali ah oo horay ahaa ee guriga ilmaha lagu xanaaneeyo wel ugu yeero inay yihiin "isticmaalka ganacsi" ee guriga dhexdiisa ah.[44] Sharciyada noocan ah waa sharciyo *khaldan*.

Akhriso Sharciga Xarunta Xannaanada Carruurta Ogow waxa Sharciga ku saabsan Qodobka Senetka ee 234 wixii macluumaad dheeraad ah.

**<u>Jajab iyo Fafaqa</u>**

**16. Dadka guriga dhexdiisa ilmaha ku xanaaneeya ma sababi doonaan guriga inuu jajabo ama fafaqo oo ay igu qaaliyeeyaan qarashka hawlaha?**

**Nadaafadda iyo badbaadada:**
Dadka ilmaha guriga dhexdiisa ku qabta *waa in* ay gurigooda ay nadiifiyaan oo ay ka dhigaan meel badbaado ah si ay u sii wataan in guriga si shatiyaysan ay ilmo ugu xanaaneeyaan. Sidoo kale dadka ilmaha guriga dhexdiisa ku qabta si *culus* ayaa sharciga goboka California uu ula socdaa. Tusaale ahaan, Shatibixinta Daryeelka Jaaliyadda ayaa la socda oo si joogto ah u kormeera guriga xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa lagu qabto. Tixgelintan waxay u janjeertaa inay dadka ilmaha guriga dhexdiisa ku qabta ka dhigaan kirayste ku habboon.

**Dayactir:**
Inta badan guryaha ijaarka ah waxay u baahan yihiin wakhti ka dib in dayactir lagu sameeyo oo dadka guriga iska leh waxaa looga baahan yahay in guriga dayactir ku sameeyaan sida sharciga waafaqsan. Dhab ahaantii, dayactirka waxaa soo sheegaya qofka guriga ijaaraha taas ayaa waxay hoos u dhigaysaa halista wax ku sheegashooda *iyo* kireeystayaashooda.

**Jajab iyo fafaqa:**
Ma jiro qof kireyste ah oo ku nool guri aan lahayn jajab iyo fafaq aan la'hayn. Haddii qofka kireystaha uu bixiyo lacagta la hormariyo, lacagahaas waxaa loo isticmaali karaa dayactir ka baxsan jajabka iyo fafaqa caadiga ah ama nadiifinta marka kiraystuhu ka guuro.

***Digniinta!*** Guri kireeyayaasha waxa kaliya ay dadka guriga ilmaha ku qabta ay weydiisan karaan inay bixiyaan lacagta laga rabo inay dhigaan marka ay guriga ijaaranayaan taas oo u dhganta:

- 2 bilood oo ah lacagta guri ijaarka ee guri aan bilnayn ah,
  **ama**
- 3 bilood lacagteed ee guri bilan[45]

Laga bilaabo **1da bisha Luulyo, 2024**, guri kireeyayaasha waxay kaliya ku dalaci karaan kiraystayaasha lacagta la dhigo ee ijaarka 1 bil, labada guryaha bilan *iyo* guriga aan bilnayn labaduba.[46]

**<u>Derisyada</u>**

**17. Dadka guriga ilmaha ku xanaaneeya qalalaase ma u keeni karaa deriska?**

Dadka guriga ilmaha ku xanaaneeya waxay daryeelaan tiro xaddidan oo ilmo ah. Ma la *mid* ah dugsiyada barbaarinta carruurta ee waaweyn ama xarumaha daryeelka carruurta.
Sawaxanka guriga ilmaha lagu xanaaneeyo wuxuu la mid yahay qaylada qoyska ay u joogto carruur badan.

Dadka guriga ilmo ku xanaaneeya maanka way ku haayaan cabashada sawaqanka, tusaale ahaan in ilmaha guriga gudi ay ku haayaan subaxii hore iyo fiidkii dambe.

Dadka ilmaha guriga dhexdiisa ku xanaaneeya sida dhammaan dadka kale ee xaafadda ama degmada degman, *waa in* ay raacaan xeerarka xakamaynta qaylada deegaanka, ama sharciyada u degsan "rabshadaha".

Dadka ilmaha guriga dhexdiisa ku xaneeyaan inta badan ma sababaan gaadiid dheeri ah sababtoo ah waxay guriga ay ku haayaan tiro ilmo oo yar, oo wakhtiga ilmaha la keeno ama laqaado ayaa inta badan isdaba joog ah.

Derisyadu waxay wax badan oo ku saabsan guri qoys oo ilmo lagu qabto ay ka ogaan karaan iyagoo booqda barta Shatibixinta Daryeelka Jaaliyadda (Community Care Licensing), https://www.cdss.ca.gov/inforesources/child-care-licensing.

Wax ka baro mas'uuliyadahaaga sharci ee Guriyeynta taas ayaa ah Furaha Tusaha Xuquuqda Kiraystayaasha iyo Milkiilayaasha Guryaha iyo Mas'uuliyadaha:

- Af Ingiriis here.
- Af Isbaanish here. [47]

---

CHILD CARE LAW CENTER

P.O. Box 9066 • Berkeley, CA 94709 415-558-8005
• info@childcarelaw.org www.childcarelaw.org

**© Child Care Law Center 2024**
Waxaa qoray qareennada jooga Xarunta Xeerka Daryeelka Carruurta. Si aad u hesho ogolaansho ah inaad nuqul ka sameyso, gudbiso ama la wadaagto macluumaadkan, iimeel noogu soo dir: info@childcarelaw.org

**Macluumaad *Sharci* – Oo Ma aha Talo *Sharci*.** Daabacaadan waxaa loogu talagaly inay kuu fidiso macluumaad sharci ah; maaha talo sharci. Xarunta Xannaanada Carruurta maaha qareenkaaga. Sharcigu inta badan wuu is-isbedelaa. Wixii talo ah ee ku saabsan xaaladdaada gaarka ah, qareen la xiriir.

**Dhammaad:** Qoraallada hoose waxaa laga soo xirtay linkiga sharciyada California iyo xuquuqahaaga mawduucan quseeya. Iska akhri iyo/ama la xiriir maktabadda sharciga deegaankaaga. Waxaa dhici karta inay kaa caawiyaan inaad fahamto sharciyada.

---

**Dhammaad:**

1 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1596.78(a)-(d).

2 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.55(a).

3 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.78(a)-(c).

4 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1597.41(a)-(b); 1597.45(a)-(c).

5 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

6 Cal. Xeerka Dawladda §§ 12900-12996; Cal. Xeerka. Xeerka § 51.

7 Cal. Xeerka Dawladda §§ 12955-12957; Cal. Xeerka. Xeerka § 51.

8 Cal. Xeerka Dowladda §§ 12980 *et seq*. *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(e).

9 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1596.78(d); 1597.45(e).

10 Guryaha xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa waxaa ka mid ah "…qayba la degan yahay ee la ijaartay, la liisgaraystay, ama milki ahaan loo leeyahay" sida hoos yimaada Qaybta 455.2 ee ah Sarciga 2022 ee Xeerka California Building Code, ee quseeya ammaanka dabka ee loogu talagalay guryaha xanaanada carruurta. Qodobka 14 ee la xiriira badbaadada dabka ee Xeerka Sharciga California ee kaabaya Xeerka Dhismaha California waxa uu qeexayaa "qaybta deggenaanshaha" sida "qayb la dego," oo ay ku jiraan guryaha wareegga ah iyo guryaha la farsameeyey. Cal. Xeerka Sharciyada., qodobka. 14, § 1267.00 (a).

11 *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.78(a)-(c). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(d)(1) (Dadka xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ku qabta waxay u baahan yihiin oo kaliya inay siiyaan mulkiilahooda ama mulkiilaha guriga ogeysiis qoraal ah inay ka shaqayn doonaan xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa.).

12 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

13 *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1596.72(a), (e)-(g). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1596.73(e)-(f).

14 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.44(d), § 1597.465(d).

15 Cal. Waaxda Soc. Serv., Cmty. Qaybinta Shatibixinta Daryeelka, LIC 9149, Oggolaanshaha Mulkiilaha/Milkiilaha Guriga Xanaanada Ilmaha Daryeelka Guriga (2014).

16 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(d)(1). (Codsadaha shatiga xanaanada ilmaha ee guriga dhexdiisa waa inuu ku caddeeyaa iyadoo ciqaab lagu mutaysanaayo been ka hor sheegidda inay ogeysiis siiyeen mulkiilaha guriga. *Eeg* Cal. Waaxda Adeegga Bulshada., Cmty. Qaybta Shatibixinta Dryeelka, LIC 279, Codsiga Shatiga Guriga Daryeelka Carruurta (2009) .

17 Cal. Waaxda Soc. Serv., Cmty. Qaybinta Shatibixinta Daryeelka, LIC 9151, Oggolaanshaha Mulkiilaha/Milkiilaha

Guriga Xanaanada Ilmaha Daryeelka Guriga (2014).

18 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(d)(1).

19 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(d)(2).

20 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.42 (Isticmaalka in guriga dhexdiisa ilmo lagu xanaaneeyo, lagu shaqeeyo sharciga hoos yimaada sharciga gobolka, guri in la dego loogu talagalay, "waxaa loo tixgelin doonaa isticmaalka la dego oo uuna qabto dhammaan xeerarka, shuruucda, iyo qaanuunka maxalliga, waana inaan wax laga beddelin sida awal loogu talagalay ee qaab ahaan ee isticmaalka hoos yimaada deegaanka.").

21 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.42 (Isticmaalka in guriga dhexdiisa ilmo lagu xanaaneeyo, lagu shaqeeyo sharciga hoos yimaada sharciga gobolka, guri in la dego loogu talagalay, "waxaa loo tixgelin doonaa isticmaalka la dego oo uuna qabto dhammaan xeerarka, shuruucda, iyo qaanuunka maxalliga, waana inaan wax laga beddelin sida awal loogu talagalay ee qaab ahaan ee isticmaalka hoos yimaada deegaanka.").

22 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

23 *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.40 ("Sharciyada madaniga, qawaaniinta, ama xeerarka maxalliga ah waa inaysan si toos ah ama si dadban u mamnuucin ama u xaddidin isticmaalka xarunta inuu guriga noqdo sidii guri daryeel carruur in qoys uu xannaano ku bixo..."). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

24 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

25 *Fiiri* Cal. Xeerka. Xeerka Madaniga ee § 1942.5(a) (Waa sharci daro in lagu kordhiyo ijaarka qaab aargoosi loo gaysto kiraystaha si sharci ah oo nabada leh oo uu u isticmaalo xuquuq kasta.).

26 Cal. Xeerka Dawladda §§ 12900-12996; Cal. Xeerka. Xeerka § 51.

27 Cal. Xeerka Dawladda §§ 12955-12957; Cal. Xeerka. Xeerka § 51.

28 Cal. Xeerka Dowladda §§ 12980 *et seq*. *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(e).

29 *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a); *sidoo kale arag*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

30 *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a); *sidoo kale arag*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

31 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

32 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

33 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

34 *Fiiri* Cal. Xeerka Xeerarka., magaca. 22 § 101221(c) (Magacyada ilmaha iyo qoyska ayaa waxaa loo texgeliyaa xog asturan. Qaybta 101221 waxay u baahan tahay in bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ay xifdiyaan dhammaan macluumaadka iyo diiwaangelinta quseysa xogta carruurta oo dhan.).

35 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(b) (Xeerarkan caymis ee isku wada midka ah ayaa lagu dabaqaa goorta xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ilmo lagu hayo kaas oo lala wadaago booska uu ka shaqeeyo Ururka Milkiilayaasha Guryaha.).

36 Cal. Ins. Xeerka § 676.1(a)-(b). *Fiiri* Cal. Ins. Xeerka § 676. ("Haddii caymiska guriga ee mulkiilaha gurigu ku jiray ugu yaraan 60 maalmood, ama ay tahay caymis la cusboonaysiiyay, waxaa dhici karta in la joojiyay ama kaliya dib loogu cusboonaysiin waayay sababo la xiriira lacagta bisha oo aan la bixin kaliya, qofka caymiska ku jiray lagu helay dambi, qiyaano, falal daayacaad ama wax ku darid la'aan ama isbeddel dhismo ee guriga caymiska ku jiray darteed kaas oo dhalisay in guriga noqdo mid la canshuuri waayo." Furida la furo xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ahloo ma texgeliyo sida "isbeddel qaabka guriga" kansalida ama cusboonaysiin la'aanta.). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Caafimaadka & Xeerka Badbaadada § 1597.41 (a)-(c) (mamnuucida isticmaalka qandaraas kasta si loo xakameeyo, ama loo mamnuuco hawlgalka guriga daryeelka carruurta qoyska ee shatiga leh.).

37 Cal. Ins. Xeerka § 676.1(a)-(b). *Sidoo kale* Cal. Ins. Xeerka § 676. ("Haddii caymiska guriga ee mulkiilaha gurigu ku jiray ugu yaraan 60 maalmood, ama ay tahay caymis la cusboonaysiiyay, waxaa dhici karta in la joojiyay ama kaliya dib loogu cusboonaysiin waayay sababo la xiriira lacagta bisha oo aan la bixin kaliya, qofka caymiska ku jiray lagu helay dambi, qiyaano, falal daayacaad ama wax ku darid la'aan ama isbeddel dhismo ee guriga caymiska ku jiray darteed kaas oo dhalisay in guriga noqdo mid la canshuuri waayo." Furida la furo xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ahloo ma texgeliyo sida "isbeddel qaabka guriga" kansalida ama cusboonaysiin la'aanta.).

38 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c); *fiiri* Cal. Xeerka. Xeerka Madaniga ee § 1942.5(a) (Guri ka saarida ama hanjabaad ka saarid aargoosi ah oo loo gaysto kiraystaha si sharci ah oo kiraysataha oo si nabad iyo sharci ah hawshiisa ugu jira waa xadgudub sharciga ka hor imaanaya).

39 Cal. Xeerka Dawladda §§ 12900-12996; Cal. Xeerka. Xeerka § 51.

40 Cal. Xeerka Dawladda §§ 12955-12957; Cal. Xeerka. Xeerka § 51.

41 Cal. Xeerka Dowladda §§ 12980 *et seq*. *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(e).

42 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.43(a) ("Guryaha xanaano ilmaha qoyska ee hoos yimaada heerarka sharciga gobolka waxay ka kooban yihiin isticmaalka dheeraadka ah ee guryaha la deggan yahay iyo guryaha loogu talagalay in la dego iyo guryaha lagu jiro oo aan wax ka beddelin qaabka isticmaalka ee loogu talgalay."). *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.42.

[43] Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.43(a). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.42.

[44] *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1597.42, 1597.43.

[45] Cal. Xeerka. Xeerka Madaniga § 1950.5(c).

[46] Cal. Xeerka. Madaniga § 1950.5(c)(1).

[47] Cal. Waaxda Hanti Maguurtada ah & Cal. Waaxda Arrimaha Macmiilka., Kiraystayaasha California – Hagaha Kiraystayaasha Guryaha 'iyo Xuquuqda iyo Mas'uuliyaddaha Milkiilayaasha. KU SAABSAN 26 (2022).